Xuska 25 Guurada JWXO

Dadka Soomaalida Ogaadeenya intii ka horysay halgankii Daraawiishta ee qarnigii 16aad waxa ay ahaayeen kuwo xor ah oo leh diin iyo dhaqan wanaagsan oo ay isku maamulaan,hase ahaatee boqortooyadii Abasiiniya ee daganayd buuralayda sare oo garab-istaag buuxa ka haysta dawladihii masiixiga ahaa ee reer Yurub ayaa waxaa galay damac balaadhan oo dhulka Ogaadeenya ah,hase ahaatee waxaa sutida uqabtay oo burburiyay damicii Abasiiniya Imaam Axmed Ibraahin Qasaali (Axmed-guray).

Alla ha unaxariistee Imaam Axmed-guray waxa uu dagaal adag ku bilaabay Abasiiniyiinta sanadku markuu ahaa 1531 kii,waxa uuna kudhuftay dharbaaxooyin xun-xun,oo ilaa iyo hadda laga dheehan karo qaar dhaqamadooda kamid ah,sida cunista hilibka caydhiin iyo kuwo keleba.

Axmad inkasta oo uu meel ku xidhay damicii Boqortooyadii Abasiiniya,hadana waxa uu shihiiday 1541 kii,kadib markii Abasiiniyiinta ay usoo hiilisay dawladda boortaqiiska,oo wakhtigaas lahayd awooda adag.

Kadib soo galitaankii Geeska Afrika ee gumaystayaashii reer Yurub waxaa gamaska xornima doonka qabtay kacaankii Daraawiishta ee uu hogaaminayay alla ha unaxariistee *Sayid-Maxamed Cabdille Xasan*,sayidku markuu u adkaysan waayay dullaynta uu Ingiriisku kuhayo umadda Soomaaliyeed iyo sida caruurtii loo wada gaalaynayo ayaa waxa uu sanadkii 1895 kii dagaal aad udheer kala hortagay Ingriiska,Talyaaniga iyo Itoobiya oo iyaduna damac gooni ahi kaga jiray dhulka Soomaalida.

Kacaankii daraawiishtu waxa uu qasab ka dhigay in ay istaagto dhamaan himilooyinkii Ingiriiska iyo Talyaanigu ay ka lahaayeen ciidda Soomaaliyeed,waxa uu halgankii Daraawiishtu noqday kii ugu adkaa xiligaas,Inkasta oo Sayidku uu Bishii december ku dhintay Magaalada Iimay ee galbeedka Ogaadeenya,hadana waxa uu iftiimiyay wadada rasmiga ah ee loo qaadi karo xoraynta ciidda Soomaliyeed,halgankaasina waxa uu la burburay bisayl la'aantii shacabka Soomaliyeed.

Jiilalkii danme ee horaantii qarnigii 20aad waxa ay noqdeen kuwo xambaarsan dareenka wadaniyadda iyo fahanka gumaysiga,badhtamihii dagaalkii labaad ee Aduunka ayaa sanadkii 1943 kii waxaa dhidibadda loogu aasay urur dhalinyaro oo xorriyad doon ah,magiciisan la odhan jiray SYL.

Halgankaasi waxa uu noqday mid himiladiisu tahay xoraynta dhamaan dhulalka Soomaaliyeed,waxa uuna wakiillo iyo laamo ku kala yeeshay dhamaan dhulalkii Soomaalida,halgankaasina waxa uu ahaa mid ay taariikhdu xustay, inkasta oo dhiig badani uusan ku daadanin,hadana waxa uu noqday midka sida dhabta ah Soomaalida ugu rumeeyay riyadoodii xoriyadeed.

Ingiriiska oo isagu gumaysanayay dhulka Ogaadeenya waxa uu sanadkii 1948 kii iyo 1954 kii dhulka Soomaalida Ogaadeenya ku wareejiyay Itoobiya oo ay 1884 kii iyo 1942 kii uga wada galeen heshiis,waxa uuna Ingiriisku si wayn udhagray dadkii Ogaadenya ee 1896 kii ay kuheshiiyeen in dhulkooda aan cidna lagala tashan karin aayihiisa oo aan iyaga ka ahayn.

Hadaba markii ay xoroobeen labadii gobol ee Waqooyiga iyo Koonfurta Soomaaliya sanadkii 1960 kii, halgankii Ogaadeenya waxa uu galay marxalad cusub oo ku kooban

xoraynta dhulka Ogaadeenya.

Dadayaaqadii sanadkii 1959 kii waxaa dhulka Soomaalida Ogaadenya ka bilawday kacdoon hoose oo markii dambe Noqday Xisbigii Nasru-llaahi,oo isna ugogol xaadhay dhalashada Jabhadda Xoraynta Ogaadeenya ee lagu aas-aasay Xodayo 1963 kii,kaasoo uu hogaaminayay aabihii Halganka Ogaadeenya *Garaad-Makhtal Daahir*.

Halgankaasi waxa uu Xabashida udhigay casharro waawayn,waxa uuna tuulooyinka iyo dhulka miyiga ahba ka qabsaday ciidamadii Xabashida,markaas ayaa golihii baarlamaanka ee Xayle Salaase waxa uu go'aamiyay in laweeraro xuduudaha Soomaliya,si Soomaaliya usoo gasho dagaalka ,dagaalkuna uyeeesho waji khilaaf xuduudeed,sidaas daraadeed Soomaliya waxa ay si toos ah usoo gasshay dagaalka halkaas oo uu dagaalkii yeeshay waji khilaaf xuduudeed oo udhexeeya Soomaliya iyo Itoobiya.

Tobodaatanaadkii waxaa soo xoogaystay kacdoonkii ururada bulshada Soomaalida Ogaadeenya oo ku cabaysan xoraynta dhulkooda kujira gacanta gumaysiga,waxaana la aasaasay halgankii Jabhadda Xoraynta Soomaali Galbeed (WSLF).

Ciidankii WSLF waxa ay sanadkii 1976 kii illaa badhtamihii 1977 kii cadawga ku qaadeen dagaallo aad ukulul oo sababay in ay gacanta ku dhigaan dhulka intiisii badnayd,waxa ayna Itoobiya ka xoraysay magaalooyin muhiim ahaa,hase ahaatee Ciidankii xoogga dalka Soomaaliyeed oo aan biyo ismarinin yaa dagaalka Soo galay,hase ahaatee isla markii waxa uu dagaalkii yeeshay waji kale,waxa ayna Itoobiya caalmka usheegtay ay Soomaaliya soo weerartay oo ay dhulkedii qabsatay,halkaas oo Itoobiya ay ku heshay garab istaag buuxa,halgankaasina faragalintii qaawanayd ee dawladii Soomaliya awgeed ma rumaynin himiladii shacabka Soomaalida Ogaadeenya.

Kadib xoogaggii gobanoodoonka ururadii bulshada iyo aqoonyhnadii waxa ay isku dayeen in saxaan halgankii,hase ahaatee arintaas waxaa hor istaagay dawladdii Soomaaliyeen oo markiiba xabsiga dhigtay gudoomiyihii JXSG alla ha unaxariistee *Maxamed Diiriye Uurdoox*.

Sidaa daraadeed waxaa lama huraan noqotay in lahello halgan tawri ah oo kamadax banaan nooc kasta oo faragalin ah, isla markaana leh go’aan qaadasho buuxda. Waxaa halkaas ku aasaasantay Jabhadda Wadaniga Xoraynta Ogaadeenya JWXO (ONLF) oo dhidibada loo aasay 15 kii August 1984 kii.

Halgankan oo xambaarsan khibrado badan oo laga dhaxlay halgamadii hore waxa uu shacabka ugu baaqay halgan daba-dheer oo aan ladhawaysanin yoolkiisa,mudo labo sano uun ah kadib waxaa heshiiyay Soomaaliya iyo Itoobiya,kaasoo Sooliya ay ogolaatay in ayna joojiso sheegashada dhulkaas Itoobiya ku maqan.

Sanadku markuu ahaa 1991 kii ayaa labadii xukuumadood ee Soomaaliya iyo Itoobiyaba ay wada dheceen,dadkii Ogaadenya ee Soomaaliya qaxootiga ku ahaana waxa ay kusoo noqdeen ciidoodii hooyo.Ururka TPLF oo ku guulaysatay talada wadanka waxa uu ugu baaqeen xooggii gobanima doonka ahaa ee dhamaan qawmiyaduhu in ay isu yimaadaan oo ay samaystaan jaartar laba sano ah, labadaas sano wixii ka dambeeyana ay gu’i karto qowmiyad kasta oo ku qanci wayda la noolaanshada Itoobiya,dastuurka wadankuna mudadaas uu ahaado jaartarkii lawada samaystay.
Jabhadda Wadaniga Xoraynta Ogaadeenya ayaa waxa ay shirwayneheedii ugu horeeyay ku qabatay magaalada Garbo ee gobolka Nogob,halkaas oo lagu doortay hogaamintii jabhadda iyo barnaamijkii siyaasiga ahaa ee jabhadda.

Sanadku markii ahaa 1992 kii waxaa dhamaan qawmiyadaha Itoobiya ka dhacay doorashooyin lagu samaynayo maamul hoosaadyo cimrigoodu yahay labo sano,waxaana doorashadii Ogaadeenya 84 % ku guulaysatay jabhadda ONLF,waxaana ladhihi karaa waa doorashadii ugu horaysay uguna dambaysay ee uu dhacda si dadka Ogaadeenya raalli kawada yihiin.

Hadaba Tigreegu markii ay arkeen in dawladda maamul hoosaadku ay tahay mid hadafka ONLF xambaarsan ayay go'aansadeen in ay qaadaan talaabo kasta oo ay ku fashilinayaan,waxaana kamid ahaa:-

1-Waxa ay xayireen dhamaan baajeedkii dawlad hoosadka.

2-waxa ay mamnuuceen in booliskii deegaanku shaqadiisa qabsado.

3-Dabyaaqadii sanadkii 1993 kii waxa ay keeneen dastuur aan la isla ogayn,kaasoo siwayn ay uga horyimaadeen dadwaynihii Soomaalida Ogaadeenya,sababayna dhimasho badan.

4-Waxa ay bilaabeen in masuuliintii ay dadku soo doorteen ay ku toogtaan magaalooyinka dhexdooda dadka oo daawanaya,sida *Miraad Layli* (Godey),**Muxumed Cumar Tube***(Qabridaharre),Deeq Maxamuud Carab* (Qabridaharre*),Duulane Xasan Gaabane* (Qalaafo*),C/laahi-ganeey* (*Wardheer*) iyo kuwo kale oo badan.

6-Waxa ay weerar ku qaadeen Gudoomihii jabhadda Sheekh Ibraahin Cabdala Maxamed oo hawlgal ujooga magaalad Wardheer ee caasimadda Doollo,halkaas oo ay ku dileen dad kabadan 53 ruux.

7-Waxa ay si qayru sharci ah ay ushiriyeen Odayaashii wadanka si ay uga helaan cod kasoo horjeeda midka baarlamaanka laga filayay ee aftida,hase ahaatee Malase shirkaas Odayaasha oo uu Joogay Garaad Makhtal guuli kama raacin.

Hadaba kalfadhigii 3aad ee baarlmaanku markii uu dhacay 15 ki March 1994 kii ee uu 100% isku raacay in afti laga qaado dadka Ogaadeenya ayaa waxa ay Itoobiya kaga jawaabtay weerar ay ku qaado jabhadda Wadaniga Xorynta Ogaadeenya iyo dadwaynahaba.

Sidaa daraadeed markii ay jabhaddu argtay in Taliska Malase uu si quman cagta usaaray wadadii ay xukuumadihii Itoobiya mari jireen ayay go'aansatay in sharafteeda ay ku raadsato qori afkii 20 kii April 1994 kii,waxa ayna duubatay calamaantii sudhnaa xafiisyadii jabhadda ee magalooyinka,laga bilaabo xiligaas ilaa iyo maalinta maanta ah waxa ay Tigreega kula jirtaa dagaal aan kala go' lahyn oo ay ku raadgoobayso hanashda xaqa shacabka Ogaadenya uu uleeyahay aayo katashigiisa.

Jabhaddu markii ay dagaalka hubaysay gashay waxa ay ugu horayn bilawday wacyigalinta bulshada si shacabka loogu carbiyo hanaan dagaal daba dheer,waxayna ahayd xiligii caqbadihii ugu adkaa ay soo wajeheen jabjadda, waayo jabhadda oo aan ciidan badan iyo dhaqaale midna haysanin isla markaana shacabkii ay ku tiirsanayd uu markii hore si wayn ugu hamiyayay in mushkiladdan lagu xallin doono si dimoqraadiyad ah ayay wakhti badan ku qaadatay in ay liqaan dagaalka ay jabhaddu gashay,dhinaca kale hanaanka ay jabhaddu kuhalgamaysay oo ah mid iskutashi ayaa waxa uu ahaa mid shacabka kucub oo ayna hadda

kahor arkin jabhad aan dawlad Soomaaliyeed dabada kawadin oo Itoobiya la dagaalanta.

Bishii 9aad ee 1998 kii waxa ay jabhaddu qabatay shirwayneheedii 2aad, shirkaas oo ka dhacay wadanka gudihii Tigraaga oo indhoodu shan yihiina intay meel kasta kasoo weerareen ay waxba ka qaadi waayeen ayaa waxaa mar kale lagu doortay hogaan cusub oo jabhadda ah,laguna dajiyay qorshayaashii mustaqbalka jabhadda,shirwaynahaas kadib waxa ay shacabku si dhab ah u aamineen in awoodda jabhaddu ay tahay mid aan la loodin Karin,waxayna si dhab ah ula garab istaageen hiil iyo hooba.isla sanadkaas waxa kale oo bilawday dagaalkii udhexeeyay Itoobiya iyo Erataria oo isaguna noqday mid saamayn wayn kuyeesha Geeska Africa.

hadaba intii ka horaysay sanadkii 2005 kii waxa ay Tigreegu qarinayeen in Itoobiya iyo ONLF uu dagaal udhexeeyo,hase ahaatee hawgalkii taariikhiga ahaa ee Mandad ee dhacay sanadkii 2005 kii laga billaabo waxa ay Tigreegu si dhab ah uqirteen dagaalka ay kula jirto ONLF.

Haba si Tigreegu ay uniyad jabiyaan dadka Ogaadeenya ee taageera halganka iyo dadka Soomaaliyeed ee ay kujirto ruuxda wadaniyaddu ayaa waxa ay qabsatay magaalada Muqdisho,hase ahaatee taasi manoqonin mid naaqusisa geedisocodkii halganka waxa ayna jabhaddu si lama filaan ah ulaban laabtay dagaalkii iyo faltanki ay kula jirtay Tigreega,kuwaas oo aad ah udhiiri galiyay mooraalkii dadka Soomaaliyeed,dagaalagas oo aad ubadnaa waxaa kamid ahaa Quusiye,Jeexdin,Cobolle,Dhamays,Ciiltire iyo kuwo kale.

Tigreegu markii ay arkeen in halganku gaadhay meel aan laga loodin karin ayaa waxa ay bilaabeen in ay dadwaynaha ugaystaan gumaad joogta ah,ayna ka gubaan guryohooda,siiba dadka miyiga ah,waxa ayna xayiraad kusoo rogeen ganacsigii ka dhexeeyay Soomaaliya iyo Ogaadeenya.

Hadaba Maanta oo ay taariikhdu tahay 15 kii August 2009 waxa ay ku beegan tahay 25 guuradii kasoo wareegtay aasaaskii Jabhadda Wadaniga Xoraynta Ogadeenya ee ahaa 15 kii August 1984 kii,sidaas daraadeed waxa aan Soomaalida Ogaadeenya leenahay **sanadguuro wacan**,waxaana ilaahay ugu rajaynayanaa in sanadguuradan mida ku xigta ay ku noolaadaan ciidda Ogaadeenya oo xor ah,umadda aan walaalaha nahay ee Soomaliyeedna waxaan iyagana leenahay joojiya daadashada dhiigga sokeeyaha,wax walbana ku xaliya wadahadal.

(Dhul ninkiisii baa iska leh)
"Ninkii dhoof kuyimid bay geeridu dhibaysaa"

Abditajir
Melbourne
Australia
Ram net